

Khidmada Jid-marka Gobalka Washington

Sida uu nidaamka u shaqeeyo

Qof kastaa ayaa isticmaali karaa wadada khidmada laga bixiyo ee ku taala Washington.

Hadii aad leedahay koonto **Good To Go!** khidmada jid-marka ayaa si toos ah looga qaadi doonaa. Hadii aad leedahay koonto, biilka ayaa laguugu soo diri boostada mu;kiilha ku diwaangashan gaariga kadib marka aad isticmaasho khidmada jid-marka, marka laga reebo wadooyinka Ka Fogaanshaha Saxmada (HOT lanes) 167.

Dhamaan gaawaarida isticmaalaya buundada SR 520, tunnel SR 99 iyo Tacoma Narrows Bridge waxay bixin doonaan lacagta jid-marka.

Wadooyinka I-405 express toll lanes and SR 167 HOT lanes darawalada ayaa leh ikhtiyaarka ah inay ku bixiyaan kharashka safarka degdega ah, la isku halayn karo ama inay ku safraan lacag la'aan haddii ay buuxiyaan shuruudaha gaariga.

Xulashooyinka bixinta khidmada jid-marka

- **Good To Go!** - waxay xaqiijineysaa inaad bixiso qiimaha oguhooseya ee jid-mar kasta. Qiimaha kaarka jid-marka waa \$5-\$15.
- **Good To Go!** Ku bixi adigo adeegsanaya tarikada gaariga* - Waxa bixineysaa **Good To Go!** Qiimaha kaarka jidmarka, oo lagud aray 25 senti oo dheeraad ah safar kasta.
- Ku bixi Boostada* - Waxaad bixini \$2 oo dheeraad ah **Good To Go!** qiimaha kaarka jid-marka safar kasta.

* Xusuusinta Ku saabsab SR 167 HOT lanes: Wadooyinka SR 167 HOT lanes malaha ikhtiyaarka lacag Ku Bixinta Taarikada Gaariga iyo Ku Bixinta Boostada. Haddi aad kaligaa wadid gaari waa inaad haysataa kaarka jid-marka **Good To Go!** si aad u isticmaasho HOT lanes. Haddii aad ku safrayso SR 167, waxaad ku safri kartaa jid-marka bilaashka ah adigoo raacaya tilmaamaha soo socda..

Haddii aad biil laguugu soo diro boostada waxaad ku bixin kartaa khadka tooska ah MyGoodToGo.com, ama taleefoonka adigoo wacaya adeegga macaamiisha 1-866-936-8246.



Khariidadda wadooyinka lacag laga bixiyo ee gobolka Washington.

Sida loogu safro jid-marka bilaashka ah marka aad la raacayso gaari dad kale wadooyinka I-405 iyo SR 167

Gaadiidlayda waxay ku safri karaan jid-mar lacag la'aan ah SR 167 haadka HOT iyo I-405 express toll lanes haddii ay buuxiyaan shuruudo gaar ah, kuwaas oo ka duwan waddo kasta.

Wadooyinka ka Fogaanshaha Saxmada (Express Toll) ee I-405

Si loogu safro si lacag la'aan ah, gaadiidlayda waa inay haystaan Kaarka jid-marka Flex oo wadooyinka Ka fogaanshaha Saxmada (HOV), iyo tirada saxda ah ee dadka baabuurka saaran wakhtiga maalinta. Maalmaha shaqada, ugu yaraan saddex qof waa inay ku jiraan baabuurka 5 subaxnimo - 9 subaxnimo iyo 3 AM - 7 PM si ay lacag la'aan ugu safraan. Inta lagu jiro duhurka, ugu yaraan laba qof waa inay ku jiraan baabuurka si ay lacag la'aan ugu safraan.

SR 167 HOT Lanes

Gaadiidlayda ay ku jiraan laba ama in ka badan oo gaadhigu waxay had iyo jeer isticmaali karaan wadooyinka ka fogaanshaha saxmada (HOT) ee bilaashka ah. Haddii aad baabuur ku dhex wadato wadooyinka HOT, kaarka jid-marka **Good To Go!** ama koonto waa ikhtiyaari. Si kastaba ha noqotee, haddii aad baabuur ku dhex wado oo aad leedahay kaarka jid-marka **Good To Go!** waa inay noqotaa Kaarka Jid-marka Flex oo ah qaabka HOV si loogu safro lacag la'aan. Dhamaan gaawaarida kale ee leh kaarka jid-marka waxa laga qaadayaa lacag iyada oo aan loo eegin inta qof ee gaariga saaran.

Shuruudaha gaadiidlayda ee wadooyinka xaaladaha degdeg ah ee I-405 express toll lanes

Subaxyada Maalmaha Shaqo ee Todobaadka	5 AM – 9 AM	3+ qof
Duhurada Maalamaha Shaqo ee Todobaadka	9 AM – 3 PM	2+ qof
Galbaha Maalmaha Todobaadla	3 PM – 7 PM	3+ qof

Wadooyinka la bixiyo khidmada jid-marka ee degdega ahi waa bilaash waxayna furan yihiin habeen iyo maalmaha dhamaadka todobaadka oo dhan.

Shuruudaha gaadiidlayda ee wadooyinka SR 167 HOT lanes

Maalmaha Shaqo ee Todobaadka iyo Maalamaha dhamaad Todobaadka	5 AM – 7 PM	2+ qof
---	-------------	--------

Wadooyinka ka fogaanshaha saxmada (HOT) waa bilaash waxayna furan yihiin habeenkii oo dhan.

Keydi lacag adoo furanaya koonto **Good To Go!**

Good To Go! koontoonyinkeeda waxay lacag kuugu kaydinarsaa wado kasta oo la bixiyo khidmada jid-marka oo ku taal Washington. Waa lacag la'aan inaad furato koonto oo aad qaadata wax ka yar 10 daqiiqo.

- **Keydi Lacag:** Darawalada leh koontada **Good To Go!** iyo kaarka jid-marka \$2 safar kasta oo lacag ah marka la barbar dhigo Lacag ku Bixinta boostada.
- **Badbaadi waqti:** Dooro ikhtiyaar lacag-bixineed otomaatig ah oo adiga kugu habboon si aadan uga welwelin biil ku bixinta boostada.
- **Waa bilaash:** There are no monthly fees and you are not required to pay tolls in advance. Ka gadashada **Good To Go!** kaarka jid-marka waa ikhtiyaari.

Qor koontada **Good To Go!**

- **Pay As You Go:** Kharashyada waxa lagu dalacayaa kaarka bangiga laba jeer bishii. Koontada waxaa lagu furan karaa si bilaash ah.
- **Khidmada Horay U bixinta ah:** Waxay kaaga baahan tahay inaad joogtayso baaqiga laga jaro khidmada horay loo bixiyayee lacagaha laga jarayo mar kasta oo aad isticmaasho waddo lacag ah.
- **Ku meel gaar ah:** Koontada ku meel gaarka ah waxay kuu ogolaanaysaa inaad akoon furto laba toddobaad kadib koonto si toos ah ayay u xidhmaysaa. Uma baahnid kaarka jid-marka adoo leh koonto ku meel gaar ah, kaliya taarikodaada iyo kaarka deynta.

Sida loo bixiyo khidmada jid-marka hadii aadan ku lahayn koonto **Good To Go!**

Hadii aadan ku lahayn koonto **Good To Go!** waxaad weli ku safri kartaa waddo lacag ah, waxaadna boostada ku heli doontaa biil 30 maalmood gudahooda ee safarkaaga. Kadib markaad hesho biil, weli waad dhimi kartaa adigoo furaya koontada **Good To Go!** taas oo lagu samayn karo khadka tooska ah marka aad biilkaaga bixinayso ama adoo wacaya adeega macaamiisha.

Sidoo kale way fududahay in laga doodo biilka online ka MyGoodToGo.com ama adoo wacaya adeegga macaamiisha.

Maxaa dhacaya haddii aadan bixin biilkaaga

Haddi aanad bixin khidmadaada jir-marka maalinta ugu danbeysa, waxa lagaa qaadi doona \$5 oo ah ganaaxa khidmada la daahiyay. Haddii aad ku bixinin khidmadaada jid-marka 80 maalmood gudahood, waxaad heli doontaa ogaysiis ciqaab madaniga ah oo ah \$40 kharash kasta oo aan la bixin. Haddii mulkiilaha gaarigu uu ku xallin waayo ciqaabta madaniga ah 20 maalmood gudahood, Department of Licensing waxa laga yaabaa inay hakiso diiwaangelinta baabuurka.

WSDOT waxay haysaa barnaamij kaa dhaafi kara khidmadaha soo daaha iyo ganaaxyada hal mar inta aad bixinayso khidmada jid-marka hore. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijka fadlan wac adeegga macaamiisha 1-866-936-8246.

Su'aalaha ku saabsan khidmada jid-marka?

Ma u baahan tahay in lagaa caawiyo furitaanka koonto ama bixinta biil? Si aad u furto koonto ama aad u bixiso biil, fadlan booqo websaytkayaga, [MyGoodToGo.com](https://www.wsdot.wa.gov/MyGoodToGo).

Haddii aad u baahan tahay caawimo luqad kale ah, fadlan ka wac adeegga macaamiisha 1-866-936-8246, marka la codsado wakiiladayadu waxay kugu xiriirayaan turjubaano ku hadlaya in ka badan 250 luqadood.

Title VI Ogaysiin Dadweyne

Waa xeerarka siyaasadda Washington State Department of Transportation's (WSDOT) si ay u xaqiijiso inaan qofna, iyadoo loo eegayo jinsiyadda, midabka, asalka wadanka uu u dhashay, sida ku xusan Title VI ee Xeerka Xuquuqda Madaniga ah ee 1964 (Civil Rights Act of 1964), laga saarayo ka qaybgalka, loo diido dheefaha, ama si kale loogu takooro mid ka mid ah barnaamijyadeeda iyo hawlaha. Qof kasta oo aaminsan in lagu xadgudbay xuquuqdiisa/eeda ilaalinta Title VI, waxa uu u dacwoon karaa WSDOT's Office of Equity and Civil Rights (OECR). Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan nidaamka cabashada Title VI iyo/ama macluumaadka ku saabsan waajibbaadyadayaada ka hortaga takoorka, fadlan kala xiriir Iskuduwaha Title VI ee OECR (360) 705-7090.

Macluumaadka Xeerka Dadka Naafada ee Maraykanka u Dhashay (Americans with Disabilities Act, ADA).

Agabkan waxaa lagu heli karaa hab ka duwan adiga oo iimayl ugu soo diraya Xafiiska Sinaanta iyo Xuquuqda Madaniga ah wsdotada@wsdot.wa.gov ama adoo wacaya khadka bilaashka ah, 855-362-4ADA(4232). Dadka dhegaha la' ama maqalkoodu ku adag yahay waxay samayn karaan codsi iyagoo ka wacaya Gudbinta Gobolka Washington 711.